DHS-8477A-SOM 10-24

DEPARTMENT OF HUMAN SERVICES

Adeegyada iyo Taageerada Bulshada Koobaad (CFSS)

CFSS waa barnaamij daryeel caafimaad oo Minnesota ah oo bixin doona fursado dabacsanaan leh si loo daboolo baahiyaha gaarka ah ee dadka. CFSS waxay dadka u oggolaanaysaa madaxbanaani aad u badan gudaha guryahooda iyo bulshooyinkoodaba. CFSS waxay bedeli doontaa personal care assistance (PCA) ((kaalmada daryeelka shakhsiyeed)) iyo Deeqda Taageerada Macaamiisha.

Sii wadista PCA

CFSS waxay dabooli doontaa adeegyada aasaasiga ah isla sida PCA:

- Waxqabadyada nolol-maalmeedka, sida cunista, qubayska, is hagaajinta iyo wareejinta.
- Hawlaha la xidhiidha caafimaadka
- Waxqabadyada muhiimka ah ee nolol-maalmeedka, sida dukaameysiga, cunto karinta iyo dhaqida
- Kormeerka iyo jihaynta habdhaqanka.

Ikhtiyaaro iyo taageero dheeraad ah

Dadka isticmaala CFSS waxay yeelan doonaan ikhtiyaaro iyo taageero dheeraad ah:

- Dadka doonaya inay sii wataan helitaanka taageerada wakaalad adeeg-bixiye ayaa weli sidaas sameyn kara iyagoo adeegsanaya qaabka wakaalada CFSS
- Qaabka miisaaniyadda ee CFSS waxay dadka u oggolaanaysaa doorasho iyo xakame dheeraad ah sida loo shaqeeyaha shaqaalahooda taageerada.

Ikhtiyaaradan cusub waxaa laga heli karaa isla labada qaab:

- Gudaha CFSS, lamaanaha qofka ama waalidka ilmaha aan qaangaadhin waxay ugu adeegi karaan sida shaqaalaha taageerada ee qofkaas
- Qofka isticmaalaya CFSS wuxuu qof kale ugu adeegi karaa sida shaqaalaha taageerada CFSS ee qofkaas
- Dadku waxay iibsan karaan nidaamka jawaab-celinta degdega ah ee shakhsiyeed si ay u bixiyaan taageero gurmad ah
- Dadku waxay dooran karaan inay iibsadaan alaabo iyo adeegyo si ay uga caawiso madax-banaanidooda
- Minnesota waxay bixisaa miisaaniyadda tababarka iyo horumarinta shaqaalaha ee loo shaqeeyaha shaqaalaha ay u isticmaali karaan tababarka shaqaalaha ee baahiyaha shakhsiyeed ee qofka.
- Adeeg-bixiyaha adeegyada la-talinta wuxuu bixin doonaa waxbarasho ku saabsan ikhtiyaarada qofka iyo taageerada qoraalkooda qorshaha adeeg bixinta.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo **mn.gov/dhs/cfss**.

Si aad macluumaadkan ugu hesho qaabab kale oo aad isticmaali karto ama caawimada helitaanka loo simanyahay ee adeegyada aadanaha oo dheeri ah, email noogu soo dir DHS.info@state.mn.us, wac 651-431-4300 ama 866-267-7655 (bilaash) ama isticmaal adeega lalinta ama isgaarsiinta wararka ee aad doorbideyso. ADA1 (3-24)